

IIB MA GALE

# FAAFINTA RASMIIGA AH

الرسمية



الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho 1da Agoosto 1986 L. 8  
JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهريّة

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanaa dii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddeedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacugta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 18 ee 10 Luulyo 1986, Oggolaan-sho Heshiis amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Afrikaanka ee Horumarinta.

Bog; 571

SHARCI L. 19 10 Luuloy 1986, Canshuur dhimista badeecadaha Dalalka Ururka Beesha Ganacsiga Sokeye ee Afrikaanka.

» 572

SHARCI L. 20 ee 10 Luulyo 1986, Oggolaan-sho ku biirid Axdigaa Caalamiga ee Qaruumada Didoobay ee Mukhaddaraadka 1971.

» 573

SHARCI L. 21 ee 10 Luulyo 1986, Oggolaan  
laansho Heshiis amaaheed dhexmaray  
JDS iyo Hay'adda Caalamiga ee «Horumarinta Mashruuca Caafimaadka  
Xoojaha».

» 574

SHARCI L. 22 ee 10 Luulyo 1986, Oggolaan  
sho Heshiis amaaheed dhexmaray  
JDS iyo Sanduuqa Caalamiga ee Horumarinta  
Beeraha «Mashruuca C/maadka Xoolaha».

» 575

SHARCI L. 23 ee 10 Luulyo 1986, Oggolaan  
sho Heshiis amaaheed dhexmaray  
JDS iyo Bankiga Horumarinta Islaam-  
ka.

» 576

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 19/Bis  
ee 1 Juunyo Qaabka iyo Dhismaha  
Hanti/ka Guud ee Dawladda.

» 577

XEER MADAXWEYNAHA JDS 20 ee 10  
Luulyo 1986, Meelmarin Heshiis amaa-  
heid dhexmaray JDS iyo Sanduuqa  
Afrikaanka ee Horumarinta.

» 585

DECREE N. 20 on 10 July 1985, Instrument  
of ratification.

» 586

XEER MADAXWEYNAAH JDS, L. 21 ee  
10 Luulyo 1986, Meelmarin ku biirid  
JDS Axdigaa Caalamiga ah ee Qaruumada  
Midoobay ee ku saabsan Mukh-/ka.

» 587

DECREE N. 21 on 10 July 1986, Instrument  
of ratification.

» 588

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 22 ee 10 Luulyo 1986, Meeimarin Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Hay'- adda Caalamiga ee Horumarinta ku- na saabsan Mash/ca Caafi/ka Xoola- ha.	»	589
DECREE N. 22 on 10 July 1986, Instrument of ratification.	»	590
XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 23 ee 10 Luulyo 1986, Meelmarin Heshiis amaabeed dhexmaray JDS iyo Sand- duuqa Caalamiga ee Horu/ta Beera- ha kuna saabsan Mash/ca Caafi/ka Xoolaha.	»	591
DECREE N. 23 on 10 July 1986, Instrument of ratification.	»	592
XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 24 ee 10 Luulyo 1986, Meelmarin Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Banki- ga H/ta Islaamka, kuna saabsan Maal/ta Mashruuca Dhismaha Jidka B. Afgooye-Aw/le.	»	593
DECREE N. 24 on 10 July 1986, Instrument of ratification.	»	594
QAYBTA                    SAD/XAAD		
TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.		
MAXKAMADDA GOB/DEGMADA BER- BERA, 17.6.86, Lumid Jeeg War. L. 90631 ku qoran Fu'aad Sheekh Ma- xamed L. 544	»	595
MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 10.6.86, Lumid Jeeg War. L. 61776 ku qoran Yuusuf Jaamac Maxamed L. 545	»	596
MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.7.86, Lumid Jeeg War. L. 024340 ku qoran Maxamed Nuur Cali L. 546	»	597

MAXKAMADDA G. BAY, 22.6.86, Lumid Jeeg War. L. 2157 ku qoran Nuur Si- raad Khalaf L. 547	»	598
MAXKAMADDA G. W/GALBEEED, 9.3.85, Lumid Jeeg War. L. 430865 ku qoran Maxamed Axmed Hawsi L. 547	»	599
MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.7.86, Lumid Jeeg War. L. 025516 ku qoran Maxamed Axmed Abuukar L. 546	»	600
MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.7.86, Lumid B. Kayd L. 6858 ku qoran C/rax maan Faarax Xuseen L. 549	»	601
MAXKAMADDA G. BANAADIR, 29.7.86, Lumid Buug Kayd L. 24487 ku qoran Xaawo Muuse Liibaan L. 550	»	602
MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.7.86, Lumid Jeeg War. L. 703715 ku qoran Cabdi Aadan Rooble L. 551	»	603
MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 21.7.86, Lumid Jeeg War. L. 543486 ku qoran Maxamed Cabdullaahi Mire L. 552	»	604

QAYBTA      KOWAAD  
SHARCI

Sharci lambar 18 taariikh 10 Luulyo 1986: Oggolaansho Heshiis amaaheed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Bankiga Afrikaanka ee Horumarinta, kuna saabsan maalgelinta Mashruuca Caafimaadka Gobolka Jubbada Dhexe.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciiga soo socda:

Qod 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Afrikaanka ee Horumarinta, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan (UA) 984.000 oo loogu talo galay Mashruuca Caafimaadka Gobolka Jubbada Dhexe.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Abidjaan ee Daïka Ivory Coast marka ay taariikhdu ahayd 9ka Maajo 1985.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharciigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaamanan Qod. 1aad ee Sharciigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinaya Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu nucelmaryo Heshiiska Sharciigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharciigan wuxuu dhaqan gelayaan isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saaraaya Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Luulyo 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.  
(Maxamed Siyeed Banre)

Sharci lambar 19 taariikh 10 Luulyo 1986: Canshuur dhimista badeecadaha Dalalka Ururka Beesha Gannacsiga Sokeeye ee Afrikada Bari iyo tan Koofureed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod 1aad

Waxaa ia oggolaaday canshuur dhimista ku tilmaaman Lifaaqa Sharcigan ee badeecooyinka iyo alaaboooyinka Dalalka Xubnaha ka ah Ururka Beesha Gannacsiga Sokeeye ee Afrikada Bari iyo Koonfureed (P.T.A.) oo Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya ay Xubin ka tahay.

Qod. 2aad

Badeecadaha iyo alaaboooyinka canshuur dhimista yeelanaya waa in ay noqdaan kuwo asal ahaan laga soo saaray Dalalka Xubnaha ka ah Ururka Beesha (P.T.A.), waaafaqsanna Shuruudaha ku tilmaaman brotokollada lambar 1, 2, iyo 3 ee Heshiiska Dhismaha Ururka Beesha oo lagu oggolaaday Sharciga iambarkii su yahay 21 ee 20ka Juun 1982.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxiyo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Luulyo 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.  
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 20 taariikh 10 Luulyo 1986: Oggolaansho ku biirid Axdiga Caalamiga ee Qaruumaha Midooobay ee Mukhaddaraadka 1971.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

Qod 1aad

1. Waxaa la oggolaaday ku biiridda JDS Axdiga Caalamiga ee Qaruumaha Midooobay, kuna saabsan Mukhaddaraadka.
2. Axdiga kor ku tilmaaman wuxuu soo baxay 1971.
3. Axdiga Mukhaddaraadka ee 1971 wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaiadaha ay qorayaan Axdiga ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Axdiga.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Axdiga Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saaraaya Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Luulyo 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.  
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 21 taariikh 10 Luulyo 1986: Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caalamiga ee Horumarinta «Mashruuca Caafimaadka Xoolaha».

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;  
WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caalamiga ee Horumarinta kuña saabsan amaaah lacageed oo dhan 5.900.000 (shanmal-yan-sagaalboqolkun) oo lacagta SDR, looguna talo ga lay «Mashruuca Caafimaadka Xoolaha».

2. Heshiiska kor ku tilmaaman waxaa lagu kala saxiiday Degmada Kolumbiya ee Dalka USA) maalin-ta ay taariikhdu ahayd 5tii Febraayo 1986.

3. Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu qorayo Heshiiska ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqan-gelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiyo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafjinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Luulyo 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.  
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 22 taariikh 10 Luulyo 1986: Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iye Sanduuqa Caalamiga ee Horumarinta Beeraha «Mashruuca Caafimaadka Xoolaha»..

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Caalamiga ee Horumarinta Beeraha kuna saabsan amaah lacageed oo dhan SDR 4.100.000 (afarmalyaniyoboqolkun) oo loogu talo galay Mashruuca Caafimaadka Xoolaha.

2. Heshiiska kor ku tilmaaman waxaa lagu kala saxiixday magaalada Rooma marka ay taariikhdu ahayd 7 Jennaayo 1986.

3. Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saara vaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Luulyo 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.  
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 23 taariikh 10 Luulyo 1986: Oggolaansho Heshiils amaaheed dhexmaray JDS iyo Bankiga Ho Horumarinta Islaamka: «Mashruuca Jidka Balcad-Afgooye-Awdheegle».

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray JDS iyo Bankiga Horumarinta Islaamka kuna saabsan ainaah lacageed oo dhan (4.1) AFAR MALYAN IYO BOQOLKUN oo Diinaarka Islaamka ah oo loogu talo galay Mashruuca Jidka Balcad-Afgooye—Awdheegle.

2. Heshiiska kor ku tilmaaman waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Jeddah markay taariikhdu ahayd 29.3.1886.

3. Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangeliitooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu mee mariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaas isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saaraayaat Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Luulyo 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.  
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 19/bis 1 Juunyo  
1986: Qaabka iyo Dhismaha Hantidhawrka Guud  
ee Dawladda.-

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lamb. yahay 14 ee  
3.6.62 ee Dhismaha Dawladda iyo Isbeddeeladii la xiriiray;

MARKUU ARKAY: Sharciga lamb. yahay 69 ee  
13.3.73 ee lagu dhisay Hantidhawrka Guud ee Dawladda.

WUXUU XEERIYHEY

Qod. 1aad

Qaabka iyo Jagooalinka Hantidhawrka Guud ee  
Dawladda iyo Xafiisyada la xiriira ayaa halkan lagu  
abuuray sida ku cad Lifaaga oo ah Qayb ka mid ah  
Dekereetadan.

Qod. 2aad

Seerkani wuxuu dhaqan gelayaas marka uu saxii-xo  
Madaxweynaha JDS. Waxaa lagu darayaa Xeerarka  
iyo Sharciyada JDS ee Dhammaaday, waxaana lagu  
soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1.6.86

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay  
Diiwaanka lamb. 5 bogga lamb. 64  
Muqdisho, 3 Juunyo 1986

Hantidhawrka Guud  
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

MADAXWEYNAHA JDS  
(Maxamed Siyaad Barre)

WASIJRKA MAALIYADDA

## KOOBID 'JAGOYINKA — HANTIDHAWRKA GUUD

QAABKA DHISMAHA EE HANTIDHAWRKA GUUD EE DAWLADDA

Jago Lamb.	Jago	Hawsha	Darajo	Tiro
32-0001	Hanti/ha Guud (Xoghayaha Joogtada ah)	Maamule	A1	1
32-0002	Madaxa Xoghaynta	Maamule	A6	1
32-0003	Xaghayn Sirta	Fuliye	B7	1
32-0004	Xoghayn Caadi ah	Karaani	C/9	1
32-0005/6	Adeegayaal	Sh.Hoose	D	2

QAYBTA SHARCIGA EE LA-TALINTA

32-0007	La Taliyaha Sharciga	Aqoonyahan	A4	1
32-0008	Kaaliyaha La Taliyaha	Maamule	A/6	1
32-0009	Madaxa Baadhista Qaybta Hore	Maamule	A/6	1
32-0010/13	Baadhayaal Baadhista Qaybta Hor	Fuliye	B7	4

QAYBTA SHAQAALAH

32-0014	Madaxa Qaybta Shaqaalaha	Maamule	A/3	1
32-0016/16	Xubin Qaybta Shaqaalaha	Fuliye	B/7	2
32-0017/18	Karaaniyaal	Karaani	C	3
32-0020/26	Wadayaal	Wade	C	7

FARRACA MAAMULKA

32-0028	Madaxa Faraca Maamulka	Fuliye	B7	1
32-0028/29	Kaaliyayaal Faraca Maamulka	Fuliye	B9	2
32-0030/32	Karaaniyaal	Karaani	C	3

AGAASINKA GUUD EE D/HOOSE

32-1001	Agaasimaha Guud ee Agaasinka Baadh. D/Hoose	Maamule	A2	1
32-1002	Madaxa Xoghaynta Agaasinka Guud	Maamule	A6	1
32-1003/4	Kormeerayaal	Kormeer	C	2
32-1005/6	Adeegayaal	Sh.Hoose	D	2

QAYBTA BAADHISTA DAKHLIGA IYO KORMEE RKA D/HOOSE (XISAABAADKA D/HOOSE)

32-1007	Madaxa Qaybta Baadh. Xisaa/ka D/H.	Maamule	A5
32-1008/10	Hantidhawrayaal Sare	Hantidhawre	A6
32-1011/15	Hantidhawrayaal	HaHntidhawre	B7
32-1016/25	Baadhayaal Sare	Baadhe	B6
32-1026/40	Baadhayaal	Baadhe	B

Qaybta Laamaha Hantidhawrka ee Go  
bolada

32-1041/46	Madaxa Laamaha Hanti. ee Gobolada	Maamule	A5
32-1047/66	Hantidhawrayaal Sare	Hantidhawre	A6
32-1067/96	Hantidhawrayaal	Hantidhawre	B7
32-1097/136	Baadhayaal Sare	Baadhe	B7
32-1137/156	Baadhayaal	Baadhe	B
32-1157/161	Karaaniyaal	Karaani	C
32-1162/173	Adeegayaal	Sh.Hoose	D
32-1174/185	Ilaaliyaal	Sh.Hoose	D
32-1186/190	Beer Wadayaal	Beer-Wade	D

AGAASINKA GUUD EE BAADHISTA WAKAALAHAA

2001	Agaasimaha Guud ee Wakaaladaha	Maamule	A2	1
2002	Madaxa Xoghaynta Agaasinka Guud	Maamule	A6	1
2003/4	Kormeerayaal	Kormeer	C	2
2005/6	Adeegayaal	Sh.Hoose	D	2
	QAYBTA BAADHISTA HAY'ADAHA			
	QAYBINTA			
2007	Madaxa Qaybta Baadh. Hay'. Qaybinta	Maamule	A5	1
2008/9	Hantidhawrayaal Sare	Hantidhawre	A6	2
2010/14	Hantidhawrayaal	Hantidhawre	B7	5
2015/24	Baadhayaal Sare	Baadhe	B7	10
2025/44	Baadhayaal	Baadhe	B	20
	QAYBTA BAADHISTA HAL'ADAHA			
	SANCADA			
2045	Madaxa Qaybta Baadhista Sancada	Maamule	A5	1
2046/7	Hantidhawrayaal Sare .	Hantidhawre	A6	2
2048/52	Hantidhawrayaal	Hantidhawre	B7	5
2053/62	Baadhayaal Sare	Baadhe	B7	10
2063/82	Baadhayaal	Baadhe	B	20

QAYBTA BAADHISTA HAY'ADAHA ADEEGA

32-2083	Madaxa Qaybta Baadhista Adeega	Maamule	A5	1
32-2084/5	Hantidhawrayaal Sare	Hantidhawre	A6	2
32-2086/90	Hantidhawrayaal	Hantidhawre	B7	5
32-2091/100	Baadhayaal Sare	Baadhe	B7	10
32-2101/120	Baadhayaal	Baadhe	B	20

AGAASINKA GUUD EE BAARISTA D/DHEXE

32-2121	Agaasimaha Guud	Maamule	A2	1
32-2122	Madaxa Xoghaynta Agaasimaha Guud	Maamule	A6	1
32-2123/4	Kormeerayaal	Kormeere	C	2
32-2125/6	Adeegayaal	Sh.Hoose	D	2

QAYBTA BAADHISTA DAKHLIGA D/DHEXE

32-2127	Madaxa Qaybta Baadhista Dakhliga	Maamule	A5	1
32-2128/32	Hantidhawrayaal Sare	Hantidhawre	A6	5
32-2133/42	Hantidhawrayaal	Hantidhawre	B7	10
32-2143/57	Baadhayaal Sare	Baadhe	B7	15
32-2158/77	Baadhayaal	Baadhe	B	20

QAYBTA BAARISTA KHARASHKA D/DHEXE

32-2178	Madaxa Qaybta Baadhista Kharashka	Maamule	A3	1
32-2179/84	Hantidhawrayaal Sare	Hantidhawre	A6	6
32-2186/94	Hantidhawrayaal	Hantidhawre	B7	10
32-2185/209	Baadhayaal Sare	Baadhe	B7	15
32-2210/229	Baadhayaal	Baadhe	B	20

QAYBTA BAADHISTA DAMBE

32-2230	Madaxa Qaybta Baadhista Dambe	Maamule	A5	1
32-2231/35	Hantidhawrayaal Sare	Hantidhawre	A6	5
32-2236/45	Hantidhawrayaal	Hantidhawre	B7	10
32-2246/78	Baadhayaal	Baadhe	B	33

Xeerka Madaxweynaha J.D.S Lambar 20 taariikh  
10 Jul. 1986 meelmarin Heshiis Amaaheed dhexmaray  
J.D.S. Iyo Sanduuqa Afrikaanka ee Horumarinta, kuna  
saabsan Mashruuca Caafimaadka Jubbada Dhexe.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Faqradda 5aad ee Qod. 67aad iyo  
Faqradda 4aad ee Qod. 82aad ee Dastuurka

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 23ka Dis.  
1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 18 ee 10.7.86 ee  
oo Gudiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga uu ku  
Oggolaaday Heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEE: In ay lagama maarmaan  
tahay in Heshiiskan la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyay Heshiiska Amaaheed ee  
Dhexmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika  
oo ku saabsan Mashruuca Caafimaadka Jubbada Dhe-  
xe, laguna kala saxiiday magaalada Abdijan ee Dalka  
Ivory Coast taariikhdu markay ahayd 9ka Maajo 1985.

Qodobka 2aad

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaadalka J.D.S.  
Awood Sharci ah.—

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaan isla maalinta uu  
saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saara  
yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Jul. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree No 20 of 10 Jul. 1986 Instrument of ratification.

THE PERSIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no 18 of on the 10.7.86 base of which the People's Assembly has aproved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement:

HEREBY PROMULGATES  
The Following Decree:

ARTICLE I

The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development Fund for financing the foredgn cechange coast and part of the local coast of a health requirement study and the preparation of architectural designs and tender documents for a health project in the Middle Juba Region, signed in Abddjan (Ivery Coast) on 9 May 1985, is hereby ratified.

ARTICLE II

This Agreement shall have a force of law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE III

This Decree shall come into force upon signature by the Preesident of Somali Democratic Republic and shall Published in Official Bulletin of the State.

Muqdisho, 10 Jul. 1986

THE PRESIDENT OF SDR  
Mohamed Siad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 21 10 Jul.  
1986 Meelmarin ku biiridda J.D.S. Axdiga Caalamiga  
ah ee Qaruumaha Midoobay ee ku saabsan Mukhaada-  
raadka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Faqradda 5aad, Qod. 67aad iyo  
Faqradda 4aad Qod. 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Tirsigiisu yahay 49 ee  
23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka bedeliida  
Dastuurka.—

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 20 ee 10.7.86 oo Golaha  
Shacbiyu ku Oggolaaday ku biiridda Axdiga Xeer-  
kan ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan  
tahay in la meelmariyo Axdiga ku biiriddiisa.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyay ku biiridda J.D.S. Axdiga  
Caalamiga ee Qaruumaha Midoobay oo soo baxay Sa-  
nadku markuu ahaa 1971 kuna saabsan Mukhaada/dka

Qodobka 2aad

Axdigu wuxuu Dalka J.D.S. ku yeejanayaan awood  
Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaan isla marka uu sa  
xiixo Madaxweynuhu waxaana lagu soo saarayaa Faa-  
finta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Jul. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree no 21 of 10 Jul. 1986 Instrument of ratification

THE PERSIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Law no of on the base of which

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no 20 of on 10.7.86 the base of which the People's Assembly has approved the Accession to the Convention on Psychotropic Substances.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Convention.

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE I

The Accession of the Somali Democratic Republic to the Convention on psychotropic Substances, signed at Vienna on 21 February 1971 is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Convention shall have a force of law in the Territory of the Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Muqdisho, 10 Jul. 1986

THE PRESIDENT OF SDR  
Mohamed Siad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lamb. 22 taariikh, 10 Jul. 1986 meelmarin Heshiis Amaaheed dhexmaray JDS iyo Hay adda Caalamiga ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Caafimaadka Xoolaha.

#### MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, Faqradda 5aad iyo Qodib. 82, Faqradda 4 ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb. 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 21 ee 10.7.86 oo Golaha Shacbiyu ku oggolaaday Heshiiska Xeerkana ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan ta hay in Heshiiskan la meelmariyo.

#### WUXUU SOO SAARAYAA Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyay Heshiiska amaaheed ee dhexmeray J.D.S. iyo Sanduuqa Caalamiga ee Horumarinta oo lagu kala saxiixday Deg. Kolumbiya ee Daika (USA taariikhdu markay ahayd 5tii Febraayo 1986, ku na saabsan Mashruuca Caafimaadka Xoolaha.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaaman Xeerkana waxay Dalka J.D.S. ku yeelana yaan awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saaxo Madaxweynaha J.D.S. Wuxaana lagu soo saaraaya Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Jul. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree no 22 of 10 Jul. 1986 Instrument of ratification

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67 para 5 and Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no 21 of 10.7.86 on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The following Decree.

ARTICLE I

The Development Credit Agreement (Livestock Health Services project) between Somali Democratic Republic and International Development Association, signed in the District of Columbia, United States of America, on 5 February 1986 is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 10 Jul. 1986

THE PRESIDENT OF SDR  
Mohamed Siad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lamb. 23 taariikh 10 Jul. 1986 meelmarinta Heshiiska Amaaheed dhexmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Caalamiga ee Horumarinta Beeraha, kuna saabsan Mashruuca Caafimaadka Xoolaha.

#### MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Faqradda 5aad, Qod. 67aad iyo Faqradda 4aad, Qod. 82aad ee Dastuurkka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka bedde-lidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 22, ee 10.7.86 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Xeerkana ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo.

#### WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyay Heshiiska Amaaheed ee Dhexmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Caalamiga ee Horumarinta Beeraha oo lagu kala saxiixday magaalada Rooma ee Dalka Talyaaniga taariikhdu markey ahayd 7 Jennaayo 1986, kuna saabsan Mashruuca Caafimaadka Xoolaha.—

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka J.D.S. aw-qod sharci ah.—

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynuhu, waxaana lagu soo saarayaa Fafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Jul. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree no 23 of 10 Jul. 1986 Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67 para 5 and Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no 22, of 10.7.86 of on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement apecified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The following Decree.

ARTICLE I

The Loan Agreement (livestick Health Services Project) between the Somali Democratic Republic and the International Fund for Agricultural Development, Signed in Bone (Itly) on 7 January 1986, is hereby Ratified.—

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 10 Jul. 1986

THE PRESIDENT OF SDR  
Mohamed Siad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lamb<sup>b</sup>. 24 taariikh 10 Jul. 1986 meelmarin Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Bankiga Horumarinta Islamka, kuna saabsan maalgelinta Mashruuca Dhismaha Jidka Balcad Afgooye Awdheegle.—

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, Faqradda 5 iyo Qod. 82, Faqradda 4, ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb<sup>b</sup>. 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dasturka.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 23, ee 10.7.86 oo Golaha Shacbiyu ku oggolaaday meelmarinta Heshiiskan.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan ta hay in la meeimariyo Heshiiska Xeerkan ku tilmaman.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meeelmaryay Heshiiska Amaaheed ee dhexmaray J.D.S. Iyo Bankiga Horumarinta Islamka oo lagu kala saxiixday magaalada Jeddah taaariikhdu markey ahayd 29,3,86, kuna saabsan maalgelinta Mashruuca dhismaha Jidka Balcad Afgooye Awdheegle.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaad Dalka J.D.S. Awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaad isla marka uu saxiixyo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saara yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Jul. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree no 24 of 10 Jul. 1986 Instrumen of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67 para 5 and Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no 23, of on 10.7.86 the base of which the People's Assembly has approved the Agreement apecified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The following Decree.

ARTICLE I

The Loan Agreement betwen the Somali Democratic Republic and the Islamic Deveiopment Bank for financing part of the local Currenney cost of feder Road project (Balad Afgoi Audegle) in Somalia, signed in Jed-dah on 29 March 1986, is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 10 Jul. 1986

THE PRESIDENT OF SDR  
Mohamed Siad Barre

MAXKAMADDA GOB. DEGMADA BERBERA

Ku: Laanta Faafinta Rasmiga ah ee D/Xamar.

OG: Bankiga Ganacsiga iyo kaydka Laanta Berbera

OC: Yuusuf Axmed Faarax L.H. Berbera

Uj: Lumid Jeega Lr. 90631 kuna Qorantaha 100,000 shs

MARKUU ARKAY: Arjiga Dacwadda uu soo qortay

J/le Yuusuf Axmed Faarax uuna ku codsanayo in  
loo caddeyo Jeegga ka lumay ee kor ku qoran.

MARKUU ARKAY: Taarka Baafinta ee la qoray

19,5,86 kana soo baxay Bankiga Ganacsiga iyo kay  
dka laanta Berbera, lagana baafiyay qaybaha kala  
Lumistay Jeegaasi.

MARKUU ARKAY: Qod. L.9.5.65, L. 2 waxaa cadaatay

in Jeegaasi War. Lr. Yahay 90631 lana qoray 15,5,86

Kuna qorantaha lacag dhan 100,000 sh,so, magaca  
yahay Fu'aad Sh. Maxamed Cabdalla uu ka lumay  
Yuusuf Axmed Faarax

### WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiyo mar labaad Jeegaasi kor ku  
qoran muddo 30 Beri gudahood ah, kaddib markii lagu  
qoran Faafinta Rasmiga ah ee dawladda Haddaan iaha  
yn qof sheegata waxaa gacanta laga saarayaa ninka  
layiraahdo Yuusuf Axmed Faarax ka lumay Jeegaasi  
ama qof ka sita awood sharci 30 Beri waa in lasugayaan  
Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Degmada Berbera.

Dr. Shawqi Cilmi Cali

Kaaliyaha Maxkamadda Degmada Berbera

Sahal Dayax Weerar

## MAJKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURO

Ku: Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee D/Xamar

UJ: Baabifn Jeega War. eeee Lamb. 61766

Garsooraha Maxkamadda Gob. Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Codsiga uu soo qortay Saleebaan  
X. Cali Cabdi ku saabsan Baafin Jeega War. ee ka  
Lumay.

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga  
iyo keydka L. Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65 Lumid Jeega War. ee  
Lam. 61776 ee ay ku jirtay sh.so. 100,000 ee ku qoran  
J/ie Yuusuf Jaamac Maxamed lagana sameeyey  
L. Burco tr. 19,5,86.

## WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiyo Jeegaas War. ee kor ku xusan  
J/le Saleebaan X. Cali Cabdi markii ay ka soo wareegto  
20 casho gudahood, laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga  
ah ee Dawladda.

## WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeega cuusb ee la sameyn doono gacanta laga  
saaro J/le Saleebaan X. Cali Cabdi iyadoo la sugayo  
mudada kor ku xusan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Togdheer Burco.  
Abuukar Islaw Cumar

L. 545

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAH MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cali Xuseen Rooble;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 0243403 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca Maxamed Nuur Cali sida ku cad warqadda Lam. 6677 tr. 7.7.86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaypta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'yo (Ammortamento) Jeeg Lam. 0243403 lagana sameeyey Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca J.le Maxamed Nuur Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cali Xuseen Rooble lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 50.000/= ee ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, had-dii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.7.86

GUDDOOMIYAH MGB  
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY

L/MGB/96/86 BAYDHABO 22.6.86

GUDDOOMIYAH M. G/BAY EE BAYDHABA

HADDU UARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo  
Ogeysiiska Bangiga;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9-9-65 L. iyo Lu  
midda Jeegga L. 2157, ayna ku qoran tahay Sh. So.  
27.904/= Shilin.

WUXUÚ AMRAYAA

In loo Cusbooneysiyo Jeegga ka dib markii ay ka  
soo wareegto 15 maalmood, maalinta Deekreetada lagu  
Shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dowiadda.

Waxaa la Codsanayaa in Jeeggaas Cusub ee loo  
sameyn doono gacanta laga saaro J.le Nuur Siraad  
Khalif, ama qof isla asaga ka sita wakaalo Sharci ah  
iyadoo la suaayo 15 beri.

GUDDOOMIYAH M. G/BAY EE BAYDHABO  
(Sheekh Xuseen Macallin Aadan)

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA  
TIRSI/MGH/5/86 Taariikhda 9.3.85  
UJ: Digireeto Cusboonaysiin Jeeg War. oo lumay lambar yahay 430865.

Guddoomiyaha M. G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jile Maxamed Axmed Hawsii, ee taariikhdiisu tahay 21.2.86 uuna ku Codsanaayo Jeegga Wareega Lambar yahay 430865 oo Lacagtiisu dhan tahay 19.000/= Shilin, oo ka iumay in loo Cusboonaysiyo;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga ee Lambarka keedu yahay 0242 ee Taariikhdeedu tahay 5.3.85, ayna ku Caddeeyeen Jeeggaas in lambarka sare ku qorani sax yahay in ay lacagtiisu dhan tahay 19.000/= Shilin uuna ku qoran yahay Yuusuf Maxamed Cigaal, Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, lana sameeyey Taariikhda ah 13.9.1984;

MARKUU ARKAY: Taarkii Faafinta ahoo ee Bangiga Laamiihiisa u waad diray ee Taariikhdiisu ahayd 15.9.84;

MARKUU ARKAY: Qod. 69-70 ee X.L.Y. 2 ee soo baxay 9.9.65kii;

MARKUU ARKAY: In lacagta Jeeggaas ku qoran uu iska leeyahay Maxamed Axmed Hawsii.

#### WUXUU GO'AAMIYHEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee lumay ee lambarkiisu yahay 430865, loona Cusboonaysiyo Maxamed Axmed Hawsii, Cusboonaysiintana gacanta laga saaro Jaallahaas ama cid awood buuxda ka haysata muddo 15 Casho gudahood ah ka dib maalinta go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtoo yada J.D. Soomaaliya.

#### WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaas lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha M. G. W/Galbeed ee Hargeysa  
(Ibraahin Faarax Maxamed)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAH MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamed Axmed Abuukar;

HADDUU TIXGALIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 025516 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca Maxamed Axmed Abuukar sida ku cad warqadda Lam. 001189 t.r. 17.7.86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'yo (Ammortamento) Jeeg Lam. 025516 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca J.le Maxamed Axmed Abuukar.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Axmed Abuukar lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 50.000/= ee ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman, markay ka soo wareeg to muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.7.1986

GUDDOOMIYAH MGB  
(Dr. Ca'bdi Salaad Shangofo)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAH MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay C/raxmaan Faarax Xuseen;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Buug Lr. 6858 lagana sameeyey Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 3.678,05 kuna qoran magaca C/raxmaan Faarax Xuseen sida ku cad warqadda Lam. 6418 tr. 27.7.86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Socinaaliyeed L. 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.62,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi' iyo (Ammortamento) B.Kaydka Lamb. 6418 lagana sameeyey Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 3.678,05 kuna qoran magaca J.le C/raxmaan Faarax Xuseen;

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le C/raxmaan Faarax Xuseen lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 3.678,05 ee ku qoran Buugga kor ku tilmaaman markay ka soo waareegto muddo aan ka yarayn 15maalmood laga bilaabo inaalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.7.86

GUDDOOMIYAH MGB  
(Dr. Cabdi Salaad Shangore)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAH MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xaawa  
Muuse Liibaan;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay B. Kayd Lam. 24487 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 26003,17 kuna qoran magaca Xaawa Muuse Liibaan sida ku cad warqadda Lam. 001249 tr. 29.7.86 Ce ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.62,  
WUXUU XEERIYAY

In la baabi'yo (Ammortamento) B.Kayd L. 24487 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 26003,17 kuna qoran magaca J.le Xaawa Muuse Liibaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xaawa Muuse Liibaan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 26.003.17 ee ku qoran Buugga kor ku tilmaaman, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maa-linta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah lagaa keenin.

Muqdisho, 29.7.86

GUDDOOMIYAH MGB  
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAH MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdi Aadan Rooble;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg War. L. 703715 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000/= k u n a q o r a n magaca Xaashi Kaariye Canshuur sida ku cad warqad da Lam. 7511 tr. 29.7.86 ee ka soo 'ba<sup>x</sup>day Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Dh/Mareeb;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.62,

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg. 703715 lagana sameeyey Laanta Dh/Mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto iacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Xaashi Kaariye Canshuur.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Dh/Mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdi Aadan Rooble iacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 50.000 ee ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman,, markay ka soo wareegto muuddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee TDS, haddii inta kahorreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.7.86

GUDDOOMIYAH MGB  
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

MAXKAMADDA G/TOGDHEER Tr. 21.7.86  
MGT/100/86

UJ: Baafin Jeegga War. ee Lam. yahay 543486, ee Tr.  
tahay 9.7.86 oo iumay.

GARSOORAH M. G/TOGDHEER BURCO

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta  
J/W/ee Lam. yahay 543486;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Baafinta Bangiga  
Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69, 65,-) Lumid Jeegga Wa-  
reega ee Lam. kor ku xusan yahay, kuna qoran J.le  
Maxamed Cabdullaahi Mire, kuna jirto Sh.So. 20,000/=  
lagana sameeyey L. Burco Tr. markay ahayd 9.7.86.

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusboonaysiyo Jeegga Wareega ee kor ku  
xusan J.le Maxamed Cabdullaahi Mire, markii ay ka  
soo wareegto 20 Casho gudahood, laguna Sharciyeeyo  
X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAALAGA CODSANAYAA

In Jeegga Cusub ee la sameyn doono gacanta laga  
saaro J.le Maxamed Cabdullaahi Mire, iyadoo ia sugaa  
yo muddada kor ku xusan.

GARSOORAH M. G/TOGDHEER BURCO  
(Maxamed Xaaaji Cabdlqaadir)

KAALIYAH M. G/TOGDHEER BURCO  
(X. X. Sugule)

### OGEYSIIS SHIR SAAMILEEY

Guddiga Maamulka Shirikadda Mashruuca Beerta Liibaan Spa wuxuu ogeysiinaya saamileyda in maalinta ay taariikhdu tahay 2.9.86 saacadduna tahay 4ta galabnimo la qaban doono Shirka Guud ee caadiga iyo caadi dhaafka ee Shirikadda laguna qaban doono Xafiiska Nootaayaha Xamar Dr. Maxamuud Diirshe oo ku yaala Waddada Roma, Muqdisho, Haddii ey imaan waa yaan cadadka laasimka waxaa Shirka Guud la qaban doonaa maalinta 4.9.86 isla meesha iyo saacaddaba.

Waxaa laga doonaya:

- Howl gaalka cusub ee Shirikadda;
- Bixinta saamiyada aan la bixin;
- Danaha Sharikadda iyo Arrimo kale;  
Waxaa lagu adkeynaya xubnaha iney waqtiga dhowraan.

GUDDOOMIYAH  
(J.le Maaxmed C. Maxamed)